# Bayaanka Bukaanka Xuquuqdiisa ee Minnesota

## Qasadka Sharci-dajinta (Legislative Intent)

Qasadka Baarlaamanka ayaa ah in bayaankaan uu hormariyo danaha iyo maslaxaladda bukaanka rugaha daryeelka ku jira. Marnaba lama oggola in rug daryeel ay bukaanka ku amarto in in uu ka tanasulo xuquuqyadaan oo sharuud looga dhigo si uu rugta ku soo gaalo. Ilaaliye ama wali kasta ee bukaanka ama, mar uusan meesha ku jirin ilaaliye ama wali, qof daneeya, ay raadin karaan adkaynta xuquuqyadaan iyaga oo bukaanka u hadlaya. Qof daneeynaya waxaa kale ee u raadin karaa in xuquuqyadaan la adkeeyo asaga oo u danaynaya eel eh ilaaliye ama wali ayadoo loo marayo hayadaha maamulka ama dardaraan maxkamad laga haysto ama maxkamad degmo ee sharci u leh ilaalinta iyo waliganimada. Ayadoo go'aan laga sugayo waxa nidaamu u socda adkaynta rugta caafimaadu waxa ay, ayadoo ay daacad ka tahay, waxa ay adeecaysaa waxa uu ilaaliyaha ama waliga farayo. Qasadka qeybtaan ayaa ah in bukaank asta xuquuqdiisa madaniga iyo xorriyadda diinta uu rabo, ay ka midyhiin go'aanka uu shakhsi ahaan xor ugu yahay iyo aqoonta fursadaha u furan, in aan faragalin lagu samayn iyo in markaasi ay rugtu ku dhiirrigalin iyo ku caawin doonto in sida ugu awoood badan xuquuyadaan lagu meelmariyo.

## Qeexitaanka

Ujeddooyi bayaankaan laga leeyahay, macnaha "bukaanka" waxa kale ay tahay qof la soo seexiyay rug bukaanjiifka daryeel

culus u baahan ee muddo 24 saacadood ka badan, taaso ujeeddadu tahay in uu jiro cudur ama daawayn saamaysa caafimaadka jirka ama maskaxda ee qofkaa. “Bukaanka” macnaheeda waxa ay tahay qof da’ yare ee barnaamijka rugta la soo dhigay sida ku qeexan Qaybta 7, Sharciga Minnesota 1986, Cutubka 326 (Section 7, Laws of Minnesota 1986, Chapter 326). Wax ujeeddada bayaankaan quseysa, “bukaanka” macnaheeda waxa ay tahay qof kasta ee caafimaadka dhimirka laga daaweynayo qaab bukaansocod ama barnaamij jaalliayddu taagereyso ama barnaamij kale ee jaalliyadda ku salaysan.

## Qaraarka Qaanuunka Guud

Waxa qaraar lagu gaaray qaanuunka guud ee gobolkaan in danta bukaan kasta lagu ilaaliyo qaraar ah bayaanka bukaanka xuquuqdiisa kuwaso ay ku jiraan balse aan ku koobnayn xuquuqda qaaska ee bayaankaan.

## 1. Macluumaadka Xuquuqda Ku  Taxluqa

Bukaanka, marka la seexiyo, waxaa loo sheegi doonaa in ay jiraan xuquuq sharciyeed ee ayaga lagu ilaalinayo muddada joogitaankaa rugta ama muddada ay daawaynta u soconaysao iyo ku haynta jaalliyadda iyo in kuwakan lagaga warbixiyay bayaanka qoraalka la socda ee xuquuqda iyo waajibaayada lagu dabaqayo ee u taagan qeybtaan. Haddii ay dhacdo in bukaanka barnaamijka dejinta iy ku haynta jaalliyaadda sida ay Qaybta 7 ugu qeexantahay, bayaanka qoraalka ah waxa uu ka warbixin doonaa xuquuqda qof 16 sano jira ama ka weyn in uu siidayn ku codsado sida Qaybta 253B.04, Qaybhoosaadka 2 (Section 253B.04, Subdivision 2) ku xusan, iyo ay la qori doono magacyada iyo lambarrada telefoonka shakhsiyaadka iyo

hayadaha bixiya adeegyada u doodidda iyo sharciga ee rugta daaweynta bukaanka quseeyas. Waxa dacwayactir macquul ah loo diyaarin doona kuwa dhegaha culus, iyo kuwa ku hadla luqad an ingiriis ahayn. Qawaaniinta rugaha ee hadda jira, baaritaannada dhacdoyinka bayaanka qoraalka xuquuqyada waxaa la siinaya bukaanna, ilaaladooda ama wakiillada ay doorteen ay sidaasi macquul ah kaga codsadaan agaasimaha ama shaqaalaha ay u xilsaareen, kaaso addecsan cutubka 13, Sharciga Dhacdoyinka Macluumaadka, iyo Qaybta 626.557 (Data Practices Act, and Section 626.557), taaso dadka waaweyn ee baylahan la xariirta.

## 2. Daaayn Xushmad Leh

Bukanaanada waxa ay xaq u leeyihiin in si xushmad iyo ixtiraam leh loogu daaweeyo ayaado shaqaalaha ama qofka adeegayda ku siinaya rugta daryeelka caafimaadka ku dhawra gaarahaanshahooda shakhsiyadeed.

## 3. Daryeel Caafimaadka Ku Habboon

Bukaannada waxa ay yeelan doonaan daryeel ku caafimaad ee ku habboon iyo daryeelka shakhsiyadeed taaso baahida shakhsinimadooda ku salaysan. Xuquuqda waxa ay ku koobantahay marka adeegga ayasan gudi karin ilaaha gaarka iyo kuwa guud loo leeyahay.

## 4. Dhakhtarka Aqoonsigiisa

Bukaannada oo idil waxaa heli doonaan ama la siin doonaa, ayadoo qoraal, magaca, cinwaanka mehereda, lambarka telefoonka, iyo takhasuska, ee qof kasta, ee dhakhtarka masuul ka ah isuduwidda daryeelkooda. Marka ay caafimnaad sidaa ku habboonayn, sida uu ka qoray dhakhtarka bukaanka xogtiisa la

socda, macluumaadka waxa la siinaya bukaanka ilaaliyihiisa ama qofka kale ee bukaanka uu u magacaabay in uu wakiilkiisa ama wakiilkeeda ahaado.

**5. Cilaaqaadka Lala Leeyahay Adeegyada Kale ee Caafimaadka**

Bukaannad adeegyada laga siinayo daryeele dibadda ah, marka ay codsadaan, waa in loo sheego aqoonsiga daryeelahaa. Macluumaadka waxaa ka mid ahaan doonaa magaca dareyeelaha dibadda, cinwaanka, iyo warbixin ku taxluqda adeegyada ay dhici karto in la bixiyay. Marka ay caafimnaad sidaa ku habboonayn, sida uu ka qoray dhakhtarka bukaanka xogtiisa la socda, macluumaadka waxa la siinaya bukaanka ilaaliyihiisa ama qofka kale ee bukaanka uu u magacaabay in uu wakiilkiisa ama wakiilkeeda ahaado.

**6. Macluumaadka Daawaynta ku Taxluqa**

Bukaannada waxa ay dhakhaatiirtooda ka heli doonaan macluumaadkooda oo dhammaystiran iyo macluumaadka hadda jira ee la xariira cudurkooda, daawaynta, daawaynta duwan, halista iyo naatijada la filayo sida ku xusan dhakharta waajibka sharciga ah ee ka saaran siidaynta macluumaadka. Macluumaadkaan in uu yeesho macno iyo luqad uu bukaanka fahmi karo ama la filayo in uu fahmayo. Bukaannada waxa goobjoog la ahaan kara xubnaha qoyskooda ama wakiillo kale oo day doorteen, ama labadaba. Macluumaadkaan waa in ku jiraan dhicitaanka xaalad caafimaad ama reebitaan xagga miyirka ee daawaynta ama daawaynta duwan.  Marka ay caafimnaad sidaa ku habboonayn, sida uu ka qoray dhakhtarka bukaanka xogtiisa la socda, macluumaadka waxa la siinaya bukaanka ilaaliyihiisa ama qofka kale ee bukaanka uu u

magacaabay in uu wakiilkiisa ama wakiilkeeda ahaado. Shakhsiyaadka xaq waxa ay u leeyihiin in maclumaadkaan diidaan.

Bukaan kasta ee kaansarka nasaha qaba waa in warbixin buuxda la siiyo, kahro ama waqtiga rugta la dhigayo iyo muddada lagu hayo, iyo guudahaan dawayn waxtaraysa ee duwan kuwaaso dhakhtarka goobjoogga uu ka warhayo, ay ka midyihiin qlitaanka, raajada, kiimikada kansarka daawaynaysa daaaawyn la isku milay iyo halista ka soo bixi karta marka hababkaas la raaco.

## 7. Ka Qeybqaadashada Qorsheynta Daawaynta

Ogaysiiska u Jeeda Xubnaha Qoyska:

(a) Bukaannada waxa ay xaq u yeelan doonaan in ka qeybqaataan qorsheynta daryeelka caafimaadkooda. Xuquuqdaan waxaa ka mid ah fursadda ah in laga hadlo dawaynta iyo waxa kale ee shakhsiyaadka daryeelka bixiya, fursad lagu codsato iyo laga qeybqaato kulan rasmi, iyo xaqa loo leeyahay in lagu daro xubnaha qooyska ama wakiillo kale ee la doortay, ama labadaba. Haddii ay dhacdo in bukaanka uusan kulanka imaan karin, xubin qoyska ka tirsan ama wakiil kale ee bukaanka uu doortay ayaa dhici karta in kulankaa lagu soo daro. Wakiilka la doortay waxa dhici karta in uu noqdo caawiye bukaanka doorashadiisa ku timid.

(b) Hadii bukaan soo galay rugta uusan miyir lahayn ama miyirbeel dheer ku jiro usaanna awood u lahayn uu warramo, rugtu waxa daadal caqligal u galaysaa si shardi ku ah

baragaraafka (c) in la waco xubin qoyska ah ama qof u qoraal bukaanka ku wakiishaday in la waco marka ay jiraan xaalado degdeg ah ee sheegaya in bukaanka rugta loo dhigay. Rugtu waa in ay xubnaha qoyska u oggolaato in a ka qeybqaataan qorshaha daawaynta, waa haddii aysan rugtu ogtahay ama rumeysantahay in bukaanka uu si qaas ee qoraal ah uu ku codsadeen in aysan rabin xubin qoyska ah in uu ka qeybqaato qorshaha daawaynta. Kaddib markii loo sheego xubin qoyska ka mid ah iyo kahor inta la oggolaan in xubin qoyska ka tirsan in uu qorysheynta ka qeybqaato, taaso raacaysa hawlaha caqgligalka ee daawaynta, in go'aamada laga gaaro haddii bukaanka uu horay u bixiyey dardaaran quseeya bukaanka daryeelka caafimaadkiisa. Ujeeddoyin quseeya baragaraafkaan, "dadaal caqligal" waxaa ka mid ah:

(1) la dhawro bukaanka waxa uu gaarka u leeyahay;
(2) la dhawro xogta bukaanka caafimaadkiisa ee rugta ay gacanta ku hayso;
(3) laga wardoono cid kasta ama xubin kasta ee qoyska oo xaalad degdeg awgeed wax laga weydiiyo haddii uu bukaanka kal hore dardaarmay iyo haddii bukaanka uu leyahay dhakhtar si joogta ah daryeelkiisa ka arrimiya; iyo
(4) laga wardoono dhakhtarka si joogto bukaanka daryeekiisa ka arrimiya, haddii la yaqaanno, iyo haddii bukaanka uu dardaarmay. Haddii rugtu ay xubin qoyska ka tirsan la soo xariirto ama u oggolaato xubin qoyska ka tirsan in ka qeybqaato qorsheynta daawaynta ayadoo la tixgalinayo baragaraafkaan ku qoran, rugtu eed uma ay geysanayso bukaanka khasaaro bukaanka ka soo gaarta ogasiiska xubin qoyska ama qof qoyska ka tirsan in xaalad degdeg ah

lagala soo xariiray ay tahay wax aan qumanayn ama jabisay bukaanka xuquuqdiisa uu gaarka u leeyahay.

(c) Marka dadaal cagligal loo galayo si ogaysiiyo in xubin qosyka ah ama qofka xaaladda degdegga u magacaaban la xariiriyo, rugtu waxa ay iskudayaysaa in ay ogaato xubinta qoyska ama qofka xaaladdda degdegga u magacaaban in eegaan waxa uu bukaanka gaarka u leyahay iyo xogta caafimaadka bukaanka oo ay rugtu gacanta ku hayso. Haddii rugtu ay healeeliweydo in ay ogaysiiso xubin qoyska ah ama qofka xaaladda degdegga u magacaaban muddo 24 sacaadood gudahood ee ka soo wereegtay marka rugta la keenay, rugtu waxa ay la xariiraysa hay'adda adeegyada bulshada ee degmada ama boliiska degmada in bukaanku uu rugta joogo iyo in rugtu ay suurtogal u noqonwday in ay qof qoyska ka tirsan ama qofka xaaladda degdegga u magacaaban la xariirto. Hay'adda adeegyada bulshada degmada ama boliiska ee rugta caawinaysa ma qaadayso eedda khasaaraha waxa uu bukaanka leeyahay soo gaara taaso lagu salaynayo in ogaysiiska loo diray xubin qoyska ah ama qofka xalaadda degdega u magacaan ay jibisay bukaanka xuquuqdisa gaarka ah. ama qofka xaaladda degdegga u magacaaban.

## 8. Taxnaanshaha Daryeelka

Bukannada waxa ay xaq u yeelanayaan in lagu daryeelo si caqligal joogto ah iyo taxnaansho leh ee hawsha shaqaalaha illaa inta ay qaanuunka rugta uu oggolaanayo.

## 9. Xaqa Daryeelka lagu Diidayo

Bukaannada lixaadka leh waxa ay xaq u leeyihiin in daawaynta diidan taaso ku salaysan macluumadka lagu waajibiyay Right

No. 6 (Xuqa Lambar 6). Xaaladaha marka bukaanka uu fahmadwaaayo xaaladda uu ku suganyahay balse aad weli sharci ahaan lagu sheegion in uusan masuul iska noqon karin, ama marka sharciga xadidayo waajibaadka uu xaq u leeyahay in waa daawaynta diido, arrimahaa iy oxaaladaha waa in uu dhakhtarka ku diwaangeliyo bukaanka xogtiisa caafimaadka.

**10. Tijaabada Cilmibaarista**
Oggolashada qoraalka, ogayssinta waxa shardi in la helo inta kahorreysa bukaanka ka qeybaqaadashadiisa tijaabada cilmibaarista. Bukaanku waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaadashada diido. Oggolaasha iyo diidmadaba, labada, wa in lagu diwaangeliyo xogta daryeelka bukaanka.

**11. Darxumada Xor Laga Ahaado**
Bukaannada waa in ay darxumada xor ka ahaadaan sida Sharciga Badbaada Dada Waaweyn ee Baylahan (Vulnerable Adults Protection Act) lagu xusay. Darxumada macnaheeda waa ula dhaqan laga warbixiyay Qaybta 626.5572, Qaybhoosaadka 15 (Section 626.5572, Subdivision 15), ama si ulakaca iyo jirka xanuun ama dhawaac loo geysto, ama habraac kasta ee joogto ah ee loogu talagalay dhiibato maskaxeed iyo mid qiira ah lagu geysanayo. Bukaan kasta waa un xor ka ahaado xauun kiimika iyo mid jireed lagu xakameynayo, marka laga reebo xaalado si buuxda lagu diwaangeliyey, ama qoraal lagu fasaxay kaddib marka bukaanka dhakhtarkiisa uu baaritaan ku sameeyay muddo khaas iyo koobaan, iyo marka keliya ay baannantahay si bukaanka uusan isugu geysan dhaawac ama uu dad kale dhawaaco.

## 12. Daawaynta Qarsoodiga Ah

Bukaannada waxa ay xaq u yeelanayaa in la xusmeeyo iyo qarsoodi laga dhigo wax la xarira barnaamijyada daawayntooda iy daryeelkooga gaarka u ah ku taxluqa. Ka xajoodka, wadatashiga, baaritaanka, iyo daawaynta kiiska ku taxluqa waa kuwo asturan iyo aan daboolka laga qaadayn. Waxa qarsoodiga ah waa in si xushma le lagu sameeyo isticmaalka suuliga, qubeyska , iyo hawalaha kale ee fayadhowrka shakhsiyeed, marka laga reebo waxa ammaanka ama gargaarka bukaanka la xariira.

## 13. Asturnaanta Xogta

Bukaannada waa in loo xaqiijiyo asturnaanta daawaynta ee xogta shakhsiyadooda iyo daawadooda, iyo ay oggolaan karaan ama diidi karaan siidayntooda u socota shakhsi kasta ee rugta ka baxsan. Macluumaadka nuqullada iyo qoraalka xogta ee xogta ku jiray in la gubiyo aydoo la xusayo qaybhoosaadkaan iyo Qaybta 144.335 (Section 144.335). Xaqqaan laguma dabaqi karo baaritaannada cabashooyinka iyo baaritaannada ay waaxda caafimaadka waddo, marka ay waajibantahay dhinac saddexad bixinyada qandaraasyda, ama haddii kale sida uu sharciga ku xusan.

## 14. Siidaynta Adeegyada Jira

Bukaannada in lagu wargeliyo, kahor ama waqtiga ay galayaan iyo muddada ay joogayaan, adeegayda ay u jiraan jiscinka rugta u qoondeeyesay ama kharashka maalinkiiba ee qolka iyo in adeegyada kale ee dheeraadka lacag kale lagu dallacayo. Rugtu waxa ku dadaal xog leh u galaysaa sidii ay ku caawin lahayd in bukaannadu ay helaan macluumaadka ah haddii barnaamijka Medicare ama Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka) ay

bixin doonaan kharash kasta ama kharashyada idil ee halkaan lagu soo hadalqaaday.

## 15. Adeegyada Jawaabta Sugan

Bukaannada waxa ay xaq u yeelan doonaan in sida ugu dhaqsiyo badan iyo ugu cagligalsan su'aalahooda iyo cosiyadooda looga jawaabo.

## 16. Asturnaanta Shakhsiyeed

Bukannada waxa ay xaq u yeelan doonaan mudnaansha kasta ee u jeedda asturnaantooda, shakhsi ahaantooda, iyo aqoonsiga dhaqameed ee heerkooda bulshadeed, diimeed, iyo niyad ahaan xalad fiicnaanshohooda la xariirta.

## 17. Cabashooyinka

Bukaannada waa in lagu dhiirrigaliyo iyo lagu cawiyo, muddada joogitaankooda idil ee rugta ama inta ay daawadooda u socoto, in ay fahmaan iyo isticmaalaan xuquuqdooda bukaan iyo midda muwaddin ahaan. Bukaanada waxa ay soo jeedin karaan cabashadooda iyo soo jeediyaan talooyin isbaddallo qawaaniinta iyo adeegyada la xariira u gudbiyaan shaqaalaha iyo kuwa kaleba doorashadooda, xor ka ah caqabadayn, faragalin, handadaad, takoorid, ama aargudasho, ay ku jirto handadaad ka saarid ah. Ogaysiiska nidaamka cabashooyinka ee rugta ama barnaamijyada, iyo xita cinwaannada iyo lambarrada telefoonnada ee Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints) iyo qeybaha sarkalka ashtakada guryaha daryeelka ee Sharciga Waayeelka Maraykanka (Older Americans Act, Section 307 (a)(12) waa in lagu dhejiyo meel ay la arki karo.

Rug kasta ee buukaanjiifka daryeelka xanuun adag, barnaamijyada rug kasta sid ku qeexan Qaybta 7 (Section 7), iyo rug kasta ee shaqaalaysiisa wax laba qof ka badan ee bixinaysa adeegyada daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaansocodka waa in ay leehato nidaam cabashooyinka gudaha ee qoraal ah oo, ugu yaraan, ee lahaato nidaam la raaco; waqti qaas ee xaddidan, ay ku jiraan xaddidyo ay rugtu kaga jawaabayso; bukaanka siinayso in uu gargaarka u doode; ku waajiban jawaab qoraal ah marka ay cabashooyin qoraal jiraan; iyo waqti loo qabtay ay ku bixinayso go'aan ku salaysan go'aan uu go'aangaare dhexdhexaad ka gaaray cabashooyinka waa haddii aanan la xallin. Adeecitaanka isbitaallada, barnaamijyada degganaanshaha sida ku qeexan Qaybta 7 (Section 7) kuwaaso ah barnaamijyo daawaynta koobaad ee isbitaalka kusalaysan, iyo xarumaha qallinka bukaansocodka ee la socda Qaybta 144.691 (Section 144.691) iyo u adeecnaanta laga rabo hayadaha haynta caafimaadka ee la socda Qaybta 62D.11 (Section 62D.11) ayaa la rabaa in ay u adeecnaato waajibaadka qoraalka nidaamka cabashada gudaha.

## 18. Asturnaanta Xog-isdhaafiska

Bukannadu waxa ay la saaxibi iyio xog-sdhaafsan karaan qofka ay doonaan iyo ay rugta galaan, marka laga reebo sida uu qorayo Sharciga Daawaynta ee Minnesota (Minnesota Commitment Act), kana baxaan haddii ay sidaad doorteen. Bukaannada waxa ay adeegsan doonaan, kharashkooda iska bixiyaan, qalaq wax la qorto, warqado iyo qalmaan, iyo tigidhada waraaqaha lagu dirsado. Warqadaha la dirsado waxa lagu dirsan doonaan ayadoo aysan wax faragalin dhicin iyo warqadaha lagu helo ayadoon aysan cidna furin marka laga reebo jiritaanka qorshe horay loo bixiyay iyo dhakhtar u siidaasi u xogta caafimaadka u geliyey.

Waa in ay jirto adeegsashada telefoonka kaaso uu bukaanku telefoon ku dirsan karo lagana soo wici karo siidaasina uu xogtiisa gaarka uga hadlo. Rugaha aan lahayn meelo gaar ah waa in ay si caqligal ugu raalligaliyaan asturnaanta bukaannada wacitaankooda. Xuquuqdaan waxa ay ku xaddidantahay meelaha aan caafimaad ahaan surtogal ahayn, sida uu dhakhtarka ku diiwaangeliyey bukaanka xogtiisa daryeelka. Marka qorshe horay loo bixiyay ay rugtu u xaddiday kahortagga xadgudubka qorshaha ayaado la raacayo Sharciga Badbaadada Dadka Baylahan, Qaybta 626.557, Qaybhoosaadka 14, Baragaraaf (b) (Vulnerable Adults Protection Act, Section 626.557, Subdivision 14, Paragraph (b)), xuquuqdaan waa in la xaddido sidii loogu talagalay.

**19. Hantida Gaarka Loo Leeyahay**

Bukannnada waxaa haysan karaan waxa ay gaarka u leeyihiin sida dharkooda iyo waxooda kale haddii boos ku filan lo ohayo, waa haddisan waxakan caqabad ku noqon xuquuqda bukaannada kale, ammaanka, ama sababaha siidasi loogu qorsheyey. Waxaa dhici karta in rugtu, balse aysan ku qasbanayn, in bixis lacag ama wax ku baddasho shayada lumay ama la xaday.

**20. Adeegyada Rugta laga Qabanayo**

Bukaannadu rugta uma ay qaban doonan shaqo ama adeegyo waa haddii aysan hawlahan ku jirin wax lagu horumarinayo daawanta iyo yihiin kuwo ujeeddo la xariira ee xogtooda caafimaadka shaqsida ku jirta.

**21. Adeegyada Ilaalinta iyo U Doodidda**

Bukaanada waxa ay xaq u yeelan in waqti cagligal ay adeegsadaan xuquuq kasta ee adeegyada ilaalinta iyo adeegyada

u doodidda si markaasi uu bukaanku ku helo gargaarka lagu eegayo, la adeegsanayo, iyo lagu ilaalinayo xuquuqda ku xusan Qeybtaan iyo kuwo ku xasan sharci kale. Xuquuqdaan waxaa ku jiri doona fursadda xog-isdhafsi asturan ee dhexmara bukaanka iyo wakiilkiisa ee xuquuqda adeegyada ilaalinta ama adeegyada u doodidda.

**22. Xaqa Siidaynta Xog-isdhaafiska iyo Xaqa Ku-xirnaanshaha loo Leeyahay**

Marka rugta la soo galayo, taaso sharciyada federaalka aan oggolayn siidaynta macluumadka aan fasax loo haysan ee aqoonsiga bukaanka lagu siinayo dad soo wacaya iyo soo booqanaya, bukaanka, ama ilaaliyaha ama waliga sharciga leh ee bukaanka, waa in la siiyo fursad ay ku oggalaadaan siidaynta ee bukaanka joogitaankiisa rugta ee wacayaasha iyo martida rabi kara in ay bukaanka la xariiraan. Illaa inta ay surtogal tahay, ilaaliyaha ama waliga sharciga leh ee bukaanka waxa ay ka fiirsan doonaan fikradaha uu bukaanka ka qabo waxa la xariita siidaynta joogitaankiisa ee rugta.

Bukaanku waxa uu xaq u leeyahay booqashada shakhsi uu bukaanka magacaabay in uu ahaado bukaanka wakiilkiisa daryeelka caafimaadka sida uu cutubka 145C (chapter 145C) qorayo iyo go’aama gaarista daryeelka caafimaadka uu shakhsi uu bukaanka magaacabay sida uu baragaraafka 22 (paragraph 22) qorayo.

Kaddib marka rugta la galiyo, bukaanka ama ilaaliyaha sharciga ama waliga sharciga ee bukaanka, waa in la siiy fursadda ah in ay magacaaabaan qof aan qaraaba soke ahayn oo geli doona booska qofka bukaanka qaraabadiisa marka la la hadlahayo

arrimaah booqashada iyo go'aan garistga daryeelka caafimaadka quseeya. Magacaabitaanka in bukaanka xogta caafimaadkiisa lagu soo daro. Ayadoo la dhawrayo samaynta goaanka daryeelka caafimaadka, dardaaranka daryeelka caafimaadka ama magacaabidda wakiilka daryeelka caafimaadka sida ku qoran cutubka 145C uu ku fidi karo magacaabid lagu sameeyay baragaraafkaan. Qof aan qaraabada ahayn waxaa sidaasi ku aqoonsanayo bukaanka ama bukaanka qoyskiisa.

## XUQUUQ DHEERAAD AH EE BARNAAMIJYADA DAAWYNTA CULUS EE LAGU BIXINAYO DAAWAYNTA KU TIIRSANAANTA MAANDOORIYAHA AMA DHALLINYARADA XANUUNKA DHIMIRKA QABA AMA RUG ADEEGYADA DHALLINYARADA QIIAL:

### 23. Faquuqidda iyo Xakamaynta

Bukaanka dhallinta yar ee barnaamijka rugta la geeyey sida ku xusan Qaybta 7, waxa uu xaq u leeyahay in xor ka ahaado xakamaayn jireed iyo faquuqid marka laga reebo xaalado ay dhici karto in bukaanka nafsad ahaantiisa ama qof kale uu dhaaci doono. Nidaamyadaan waxaa kaloo loo isticmaali karaa ama uu biixiyay dhakhtarka, daaweehaha caafimaadka dhimirka, ama xeeldheere lagala tashado caafimaadka cilmu nafsiga, marka habab kale ee xakamaynta ah ay shaqaayn waayeen ama aysan surtogal ahayn iyo in dhicitaan waxaan oo idil noqoto muuddo aad u gaaban.

### 24. Qorhsha Daawaynta

Bukaanka dhallinyarada ah ee barnaamijka rugta la dhigay sida Qaybta 7 ku xusan, waxa uu xaq u leeyahay qorshe daawayn ee

qoraal ee ka hadlaya xeerarka dabeecadda ee dhiibaatooyinka kiiska, ujeeddada saxda ah ee qorshaha, iyo nidaamka la isticmaali doono si lagu soo gaabiyo muddaada uu bukaanaku sida bukaanjiif loo daawaynayo. Qorshuhu waa in uu si cad u kala dhigdhigo ujeeddada looogu gudbinayo rug ka xakamayn yar iyo tallaabooyinka daawaynta iyo adeegyada xigi doona, haddii ay ku habbontahay. Illaa inta la qiyaasi karo, bukaanka dhallinyarada ah iyo waalidkiisa am awaalidkeeda ama ilaalliya ayaa ka qeybqaadanaya qorshaha horumarka daawaynta iyo ka bixidda.

**Su'aalaha ama cabooshooyinka quseeya caafimaadka daawaynta burkaanka ama Xeerka Bukaanka Xuquuqdiisa waxa loo diri karaa:**

**Guddiga Minnesota ee Hawlaha Caafimaadka**
**(Minnesota Board of Medical Practice)**
2829 University Ave. SE, Suite 400
Minneapolis, MN 55414-3246
Telefoonka: (612) 617-2130
(800) 657-3709

**Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka**
**(Office of Health Facility Complaints)**
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970
Telefoonka: (651) 201-4201
(800) 369-7994

**Su'aalaha la xariira helitaanka daryeelka bixitaanka ka hormaray waqtiga loo qabtay waxaa loo diri karaa: Sarkaalka Baara Cabashada Daryeelka Muddada Dheer (Ombudsman for Long-Term Care)**
P.O. Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
Telefoonka: (800) 657-3591 ama
(651) 431-2555 (magaalada iyo degaannada u dhow)

**Qoraalka waxa bixiyay Isbitaallada Minnesoa iyo Iskaashatada Daryeelka Caafimaadka (Minnesota Hospital and Healthcare Partnership). Turjumidda waxaa maalgalisay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health). Macluumaadka dheeraada ee turjimiddaan ku taxluqda, la xariir Minnesota Department of Health ee laga wacayo (651) 201-3701.**